



Waxa aad filan karto?




CODSIGAYGA MAGANGALYADA






Inta aad sugayso go'aanka, **ha u bixin** waddan kale adigoon haysan oggolaansho.

- Haddii aadan ku laaban karin dalkaga sababtoo ah uu khatar kugu yahay, **waxaad halkan ka codsan kartaa magangelyo**
- Magangelyo waxaa sidoo kale loo yaqaan **ilaalinta caalamiga ah**.
- **Ilmaha (ka yar 18 sano)** ee kaligii yimaadda waxaa loo xilsaarayaa **masuul** si uu u taageero.
- Marka ay saraakiishu hubiyaan dhammaan macluumaadka, waxay go'aamin doonaan **haddii aad u baahan tahay magangelyo ama aanad u baahnayn**.

DIWAAANGELINTA

-  Saraakiishu waxay **diwaangelin doonaan codsigaaga**, waxay qaadi doonaan **sawirkaaga** iyo **farahaaga** (haddii aad ka weyn tahay 6 sano), waxayna hubin doonaan dukumentiyadaada.
-  Waxaa lagu siin doonaa **dukumentii muujinaya in aad magangelyo codsatay**. Si ammaan ah u hay.
-  Marka diwaangelintu dhammaato, waxaa lagu siin doonaa casuumaad ay ku qoran tahay **taariikhda**, **waqtiga** iyo **goobta** wareysiga.



INTA AAD SUGEYSO WAREYSIGAAGA

-  Inta aad sugayso, waxaad degi doontaa **meel ammaan ah**. Inta aad sugayso, isku day inaad **naftaada mashquuliso**.
-  baro luqadda deegaanka, sameyso saaxiibo cusub, ciyaar ciyaaraha, oo caafimaadkaaga ilaali.
-  Weydii ilaaliyahaaga ama la-taliyaha sharciga inay kaa caawiyaan **diyaarinta wareysiga**.





Ha seegin wareysigaaga magangelyo! Haddii aad xanuunsan tahay, wargeli saraakiisha.

WAREYSIGA MAGANGALYO

-  Waxa lagu weydiin doonaa **sababta aad uga soo tagtay dalkaga**, qoyskaaga, noloshadii hore iyo safarka aad soo martay.
-  **Keen dukumentiyadaada** (aqoonsi, sawirro, warbixinno) si ay u taageeraan sheekadaada.

GOAANKA

- Ka dib dhowr bilood**, waxaad heli doontaa go'aanka.
-  Haddii go'aanku oggolaansho yahay, waxaad ku sii jiri doontaa dalka oo lagu siin doonaa guri joogto ah.
-  **Haddii go'aanku diidmo yahay**, waxaa lagu wargelin doonaa fursadaha ammaan ee aad ugu laaban karto dalkaga. Haddii aad aanad raacsanayn go'aanka, waxaad si rasmi ah u dacwoon kartaa. Kani waxaa la yiraahdaa **racfaan**.

XASUUSO

- ✓ Waxaad la hadli kartaa qareen si aad talo uga hesho ku noqoshadaada ama sida racfaan looga qaato go'aan diidmo ah.
- ✓ Weydiso turjubaan haddii aadan ku hadlin luqadda.
- ✓ Haddii aadan awoodin inaad ka jawaabto su'aal, waa inaad si daacad ah u tiraahdaa.
- ✓ Dhammaan saraakiishu waa inay kugula dhaqmaan si ixtiraam leh.
- ✓ La shaqee saraakiisha Weydii inay kuu sharxaan haddii ay jiraan wax aadan fahmin.



Somali